

LIISKA HUBINTA QORSHAHA GANACSIGA

Codsiyada waa in aay la socdaan qorshe ganacsi. Qorshaha ganacsigu wuxuu naga caawin doonaa inaan ogaano ganacsigaaga, halka ganacsigaagu u socdo iyo sababta aad ugu baahan tahay maalgelin. Liistada hubinta ee hoose waxay qeexaysaa mawduucyada caadiga ah ee lagu daro qorshaha. Mawduucyada oo dhan lagama yaabo inay khuseeyaan ama si siman muhiim ugu yihiin ganacsigaaga. Waa in aad go'aansatid waxa aad xoogga saarayso iyo sida loo dalbado mawduucyada si aan sida ugu wanaagsan ugu fahanno ganacsigaaga. Mawduuc kasta, waxaanu ku soo darnay su'aalaha aan filayno in laga jawaabo markaan dib u eegno qorshahaaga.

✓ **Codsiga Maalgelinta**

Maxaad u qorshaysay inaad u isticmaasho amaahdaada? Waa maxay dhammaan ilaha dhaqaalaha aad isticmaali doonto? Waa maxay saamaynta la filayo ee amaahda? Sideed filaysaa inaad dib u bixiso amaahda? Maxaad dammaanad ahaan ku bixinaysaa sideese ku qiimeysay?

✓ **Sharaxaada Ganacsiga**

Noocee lahaansha ayaa lagu aasaasay ganacsiga? Waa maxay nooca ganacsiga? Intee in le'eg ayaad ku jirtay ganacsiga?

✓ **Sharaxaada Alaabta ama Adeegga**

✓ **Wax soo saarka iyo Qiimaha**

Ma jiraan wax caqabado ah oo aay waahayaan soo saarista alaabtaada ama adeegyadaada? Ma jiraan dhinacyo muhiim ah oo xilliyeed, kharashyo, ama kharashyada ganacsiga? Waa ayo alaab-qeybiyeyaashaada? Waa maxay xoogga iyo daciifnimada alaab-qeybiyeyaashaada?

✓ **Suuqa**

Yaase wax kaa iibsanaya maxaase kaaga iibsadaan? Waa maxay baaxadda suuqa? Waa ayo macaamiishaada ugu weyn? Immisa boqolkiiba iibkaagu ka kooban yahay? Ma jiraan walaac juqraafi ah ama xannibaadyo? Sideed u gaartaa macaamiishaada? Waa maxay isbeddellada taariikheed? Suuqu ma u nugul yahay isbeddelka alaabta? Ma alaabta ayaa dhacda?

✓ **Falanqaynta Tartanka**

Waa maxay saamigaaga suuqa? Yaa kale oo bixiya alaabtaada ama adeeggaaga? Sideed iskaga soocdaa kuwa kale? Haddii aad tahay bixiyaha kaliya, xagee ayuu ka dhalani karaa tartan cusub? Sidee badeecadahaaga ama adeegyadaadu u barbar dhigaan kuwa kale xagga qiimaha? Ma xaga tayadabaa?

✓ **Kooxda Maamulka**

Bixi liiska maamulayaasha iyo/ama maareeyaasha mas'uulka ka ah hawsha ganacsiga. Bixi sharaxaad kooban oo ku saabsan waayo-aragnimada, waxbarashada, farsamada iyo ganacsiga mid kasta; sheeg meelaha ay ka masuulka yihiin shirkadaada dhexdeeda. Sidoo kale, tilmaan agab kasta oo kale oo ganacsigu ka soo qaadan karo. Dakhliga ma laga soo saari doonaa qayb ahaan iyada oo loo marayo ururadii hore? Ku dar nuqulka resumeygaaga iyo oo aay waheliyaan kuwa kale ee muhiimka u ah guusha joogtada ah ee ganacsiga.

✓ **Waxyaabaha laga walaaco**

Aqoonso khataraha iyo dhibaatooyinka iman kara. Kala hadal caqabadaha ugu waaweyn ee ku hor gudban qorshahaaga - Waa maxay istaraatiijiyad aad adeegsani rabtaan si aad u yaraynaysaan khatarahan? Sharax sida deynta loo bixin lahaa haddii ay dhacdo ganacsigu guuldareysto.

Adeegyada la-talinta ganacsiga ee bilaashka ah ayaa diyaar u ah codsadyaasha amaahda, la xidhiidh brc@vcf.org.